**Waaxda Caruurta iyo Qoysaska**
**Waaxda Adeegyada Qoyska**
280 State Drive
HC 1 North Bldg B
Waterbury, VT 05671-1030

*Hay'ada Adeegyada Bilaa Aadanka*

Maarso 19, 2020

Mudane Daryeelaha Koriyaha Reer Vermont,

Qoys siinaya ahaan daryeelka daruuriga ah iyo taageerada caruurteena nuqul iyo qoysaskooda waad isku tiirsan tihiin midkiinba midka kale maalin kasta. Waxa aanu kaaga mahadnaqaynaa naxariistaada iyo daryeelka aad kaga jawaabtay xanuunka ka dilaacay bulshadeena wakhtigan iyo jawaabta isasoo taraysa ee caabuqa COVID-19. Waanu ognahay in dugsiyadu xidhan yihiin oo daryeelka ilmahana la xidhay taas oo markaa ku keeneysa caqabad dheeraad ah daryeel bixiyaha. Waxa aanu kala shaqaynaynaa Xafiisyadeena Degmada inaan ogaano oo aanu markaa kaa caawino baahiyaaga.

Waxaanu fahansanahay in xaaladan ay la socdaan su'aalo aad u badani. Waaxda Adeegyada Qoysku waxa ay ka faa'idayn doonaan websaytka si markaa loo joogteeyo xidhiidhka macluumaadka adiga, cida aanu wada shaqayno, iyo qoysaska aanu u shaqayno.

https://dcf.vermont.gov/fsd/COVID19

Waaxda Caafimaadka Vermont waxa ay samaysay websayt dhamaystiran kaas oo maalin kasta 2 duhurnimo macluumaad cusub lasoo geliyo. Tani waa meesha ugu wanaagsan ee ay tahay in loo doonto macluumaadka ku saabsan COVID-19 su'aalaha gaarka ah ee laga qabo. Waxa aanu isku daynaa inaanan aayar soo gelin macluumaadka bartan maadaama ay kolba wax isbadddalayaan maalin kasta.

https://www.healthvermont.gov/covid

Waxa aad ka heli doontaa jawaabaha su'aalo badan oo la xidhiidha halkan, oo ay ku jiraan:

1. *Sidee ayaan uga taxadiri karaa si aan iskaga ilaaliyo COVID-19?*
2. *Waa maxay calaamadaha COVID-19?*
3. *Sidee ayay wax noqonaynaan hadii qof meesha aan ka shaqeeyo ama qoyskayga ah uu xanuunsado?*
4. *Sidee ayay wax noqonaynaan hadii qog meesha aad ka shaqeeyo ama qoyskayga laga helo COVID-19?*

Waxa aad la hadashaa dhakhtarkaaga daryeelka kowaad hadii qof kamid ah qoyskaagu uu xanuunsado. Waxa aad soo gaadhsiisaa wixii xanuun ah ee ay dhici karto inuu noqdo COVID-19 Waaxda Caafimaadka VT oo kala soo hadal (802) 863-7240. Sidoo kale, waxa aad wargelisaa Shaqaalaha Adeegyada Qoyska hadii qof kamid ah qoyskaaga uu xanuunsado.

5. *Sidee ayaan caafimaadka u ilaashan karaa?*

Waxa aanu kugu dhiiri gelinaynaa inaad macluumaadka la socoto maadaama oo ay ku jiraan talooyinka inaad dadka ka fogaato. Qaar kamid ah Ururada Waalidka Korinta ee deegaanka ayaa leh bogag Facebook halkaasoo lagu wadaagi karo macluumaadka kusaabsan khyaraadka iyo taageerada. Waxa aanu ogaanay in daryeelayaasha qaar ay la shaqaynayaan "qoysaska lala shaqeeyo" taas oo markaa qayb ka ah isticmaalkooda caadiga ah ee baraha bulshada. Marka la isku kaashado, si tiro yar, qoysaska waxa ay buuxinayaan baahiyaha midba midka kale - tagista boosharIga, farmasiga, iwm.

6. *Waxa aan ka warwarsanahay in xaalad dhaqaale xumo ay lasoo daristo qoyskayga?*

Waxa aanu fahansanahay inay tani tahay muhiim oo ay saamayn dhaqaale ku yeelan karto qoyskaaga. Waxa aanu la shaqaynaynaa Xafiiska Shaqada si aanu u ogaano taageero dhaqaale oo aad heli karto wakhtigan bandooda. In dheeraad ah ayaa dhawaan lasoo gelinayaa.

Waaxda Shaqaalaha Vermont waxaa uu ku amray Badhasaabku inay kordhiyaan caymiska bilaa shaqada ee dadka reer Vermont ee qaada kadib markii la armay in daryeel caafimaad bixiyayaasha ay is-takooraan ama ay dadka ka dhax baxaan.

7. *Sidee ayay wax noqonaysaa hadii ay ilasoo daristo xaalad degdeg ah marka shaqada laga baxo?*

Barnaamijka Adeega Xaalada Degdegga ah ee Waaxda Adeegyada Qoyska (Family Services Division's Emergency Service Program, ESP) waxa ay shaqaalaheedu sii wadi doonaan shaqada 24/7. ESP waxaad kala hadli kartaa 1(800)649-5285. Waxa aanu dhiiri gelin doonaa in la xadido socodka caruurta ee meel inta laga kaxeeyo meel kale la geeyo mudadan si aanu u raacno tilmaamaha Waaxda Caafimaadka Vermont.

Waxa aanu fahansanahay inay dhici karto inaad qabto tabasho ku saabsan sidii aad ilmo cusub aad gurigaaga u keeni lahayn wakhti xaadirkan. Waxa aanu samaynaynaa wax kasta oo nala gudboon in aanu caruurta gayno meelo ay garanayaan, iyo daryeele ay garanayaan. Waxaa jiri doona xaalado ay taasi macquul noqon doonto. Shaqaalaheena ayaa u sheegi doona macmiil kasta oo aanu la kulanay inuu diyaarsado su'aalaha shaybaadhka COVID-19. Sidoo kale, ilmaha waxaa loo gudbin doonaa dhakhtarka daryeelka kowaad si loogu sameeyo qiimayn xaaladiisa caafimaadka si loo ogaado hadii ay tahay in laga baadho COVID 19 halkaas oo su'aalaha baadhitaanka jawaabteedu tahay "haa".

8. *Miyuu Medicaid bixiyaa kharashka ka la xidhiidha COVID-19?*

Caruurta la hayo waxaa kharashkooda bixiya Medicaid. Waxaa la bixinayaa shaybaadhka COVID-19. Sidoo kale, dawooyinka qaar aan dhakhtar qorin waxaa bixinaya Medicaid.

9. *Waa maxay tilmaamaha xidhiidhka waalidka iyo ilmuhu?*

Xidhiidhka waalidka iyo ilmaha ayaa la hakiyay mudo 48 saacadood ah laga bilaabo 03/17/2020 ilaa 03/18/2020 si markaa loo fududeeyo sida hore looga soconayo xaalada wakhtigan. Laga bilaabo 03/19/2020 waxaa meel la dhigay tilmaamaha soo socda:

Marka ilmaha laga qaado waalidka oo laguna wareejiyo DCF, waalidka iyo ilmaha waxaa xidhiidhkooda amraysa maxkamada, oo DCF, gacan ku haye ahaan, waxa saaran masuuliyada in la xaqiijiyo in xidhiidhkani uu dhaco. Sidoo kale, wakhtigan uu jiro xanuunka COVID-19, DCF waxaa saaran masuuliyad ah inay xaqiijiso in kulankaasi u dhaco qaab amaan ah oo munaasab ah, kaas oo waafaqsan tilmaamaha Waaxda

Caafimaadka, taas oo waafaqsan filashooyinka maxkamada.

Waxa aanu hirgelinay oo iminka shaqaynaya nidaam aanu ugu wareeganayno in taleefanka ay ku wada hadlaan waalidka iyo waalidka caruurta korinaya (ama shaqaalaha daryeelka) ee caruurta/dhalinyarta ay hayso DCF si loogu sameeyo xidhiidh amaan ah oo munaasab ah ilmaha iyo waalidka. Tani waxa ay ka dhigan tahay inay ku wada hadlaan maqal/muuqaal badanaa.

Qorshaha maqal/muuqaalka ah oo faahfaahsan ayaa la diyaarin doonaa oo lana duwaan gelin doonaa, oo dadka hawshaa fududeynayaana waxay kala socon doonaan xidhiidhka elektorooniga ah waalidka marka la eego qorshaha qoraalka ee xidhiidhka iyada oo aan meel la wada joogin. Xidhiidhkan elektorooniga ah waxaa kamid noqon doona tilmaamaha waalidka inay tahay inay kaa sheekeystaan qareenkooda wixii ku saabsan ikhtiyaaradooda, oo ay markaa ku heshiiyaan qorshe qoraal ah oo ay u gudbiyaan dhamaan dhinacyada.

Qorshayaashan waxaa loo samayn doonaa in lagu dabaqo mudada ay Vermont ay ku jirto xaaladan degdegga ah. Taasi wakhti xaadirkan waa mudada u dhaxaysa 3/19/20 ilaa 4/15/20.

Waalidka waxaa lasiin doonaa ikhtiyaar ah sida xidhiidhka waalidka iyo ilmuhu u dhici karo (sida, iyaga oo wada jooga, taleefanka, Skype, iwm...), waxaana kamid ah xadiga xidhiidhka oo qayb ka ah qorshaha. Qaabka la doorbidayo ee la dhiiri gelinayaa waa in uu noqdo maqal iyo muuqaal. Kahor inta aan lagu socon wixii qorshe xidhiidh ilmaha/waalidka ee toos ah waxaa lagu xisaabtami doonaa shayada soo socda:

- dadka ku lugta leh xidhiidhka waalidka iyo ilmaha (waalidka, ilmaha, ama daryeelaha) inayna u dhawaan qof qaba COVID-19,
- cid kamid ah dadkan inayna dareemin xanuun calaamado dhibtaado neefsiga ah oo uu isku arkay dhawrkii maalmood ee lasoo dhaafay,
- cidna dadka tooska ugu lugta leh xidhiidhka ilmaha iyo waalidka (waalidka, ilmaha, ama daryeelaha) ama shakhsi kale oo qoyskooda ah looma arko inuu kamid yahay shacabka aad khatarta caafimaad ugu galaya hadii uu qaado COVID-19

Mararka uu waalidku dalbanayo in xidhiidh foolka-fool ah uu la yeesho oo ayna jirto cadaymo muujinaya inuu taabasho COVID ama uu u nugul yahay, FSD waxa ay u gudbin doontaa maxkamada dalabka ah in taleefanka ama maqal iyo muuqaal laga dhigo xidhiidhkooda.

Waxa aanu fahansanahay in macluumaadka sare aanu ka wada jawaabi karin wixii tabasho ee aad qabto ee ku saabsan xidhiidhka waalidka iyo ilmaha ee gurigaaga iyo qoyskaaga. Fadlan waxa aad kala shaqaysaa xafiiska degmada deegaanka wixii ku saabsan xaaladaha gaarka ah.

10. *Sidee ayuu noqonayaa kulanka foolka-foolka ah ee Shaqaalaha Adeegyada Qoyska (Family Services Worker, FSW) ee bishii?*

Kulanka Foolka-Foolka ah ee u dhaxeeya booqashooyinka caruurta ama dhalinyarta gacanta lagu hayo ama qaraabo korinayso waa la joojiyay mudada Bandooda Laga Iclaamiyay Gobolka Vermont (wakhtigan ilaa Abriil 15, 2020) iyada oo ay jirto walaac amaanka ilmaha ama qofka dhalinyarta ah moojee. FSW waxaa weli looga baahan yahay inuu jiro xidhiidh ugu yaraan hal mar bishii ah oo ilmo kasta ahi.

11. *Sidee ayaan u maaraynayaa wixii balan ah ee ilmaha aan daryeelayaa uu leeyahay?*

Wixii balanta daawaynta ah, xarumaha caafimaadka qaar ayaa ka dhigay maqal iyo muuqaal. Waxa aad kala

socotaa daryeel bixiyahaaga hadii ikhtiyaarkaasi uu jiro. Waa kan linkiga Hay'ada Caafimaadka Maskaxda ee Qaabilsani: https://mentalhcalth.vernont.gov/services/emergency-services/how-get-help

Wixii balanta caafimaad ee caadiga ah ee aan wakhti ka dhacaynin, waxa aanu ku talinaynaa in loo wareejiyo wakhti kale si loo xadido suurtogalnimada u baylahidda. Waxa aanu maqalnay in isbitaalada caruurta la iska keeni jiray la xidhay. Fadlan waxa aad xaqiijisa inaad la xidhiidho dhakhtarkaaga kowaad kahor inta aanad qaban xarunta daryeelka degdegga ah, taasina waa si looga hortago in mudo badan aad ku sugto meel ay joogaan dadk badan oo ay u badan tahay inay xanuunsanayaan.

12. *Miyey jiraan khayraad wanaagsan oo iiga jawaabi kara su'aalaha daryeelka caruurta aan iska waydiin karo oo ku saabsan Corona Fayrus?*

https://www.nctsn.org/sites/default/files/resources/factsheet/outbreak_factsheet_1.pdf?fbclid=IwAR02_xh6JTvFs34K2q_w38m2AbywAx4JTajSw7NEAdsoX43YdmWeoLzQvgg

Waxa aanu la soconaa in daryeelayaasha qaar ayna lahayn iimeel, oo ayna siinina cinwaan iimeel Waaxda ama ay badaleen cinwaankooda iimeelka oo ayna siinina cinwaanka cusub Waaxda. Hadii aad garanayso cid ay dhici karto inay ku jirto xaaladaas, fadlan la wadaag macluumaadkan. Sidoo kale, dadka u baahan in macluumaad joogto ah ay helaan ama ay iimeel usoo diraan Waaxda, fadlan ugusoo dira Magaciina iyo Magaca Awowga iyo cinwaanka iimeelka Maamulaha Nidaamka Qaybta Daryeelka, Barb Joyal: Barbara.Joyal@vermont.gov

Ugu danbayntii, waxa aanu doonayaa in aan kaaga mahadnaqo dhamaan dadaalkaaga joogtada ah ee aad ku buuxinayso baahiyaha dadkeena reer Vermont ee ugu nugul. Waynu ku wada jirnaa tan!

Mahadsanid,

*[SAXEEXA]*
Christine Johnson
Gudoomiye Ku Xigeen
Waaxda Adeegyada Qoysaska ee DCF